

Khataraha shaqaalaha kasoo gaadhi kara fentanyl

Shaqaaluhu waxa laga yaabaa inuu fentanyl ku taabto ul irbad, taabashada maqaarka, nuugista, dhinaca neef qaadashada, ama taabashada dareeraha xuubabka, sida indhaha ama sanko. Shaqaaluhu waxay aad ugu bandhigan yahay inuu la kulmo fentanyl isagoo samaynaya taabasho kooban oo dhinaca maqaarka ah. Ka jawaabayaasha degdega ah waxay haystaan fursad aad u yar oo ah inay la kulmaan taabashada maqaarka si macne caafimaad leh oo aanay dhibi kasoo gaadhayn.

Haddii shaqaaluhu isticmaalaan hababka ku habboon iyo taxaddarrada caalamiga ah, waxay u badan tahay in ay ku yartahay khatarta u nuglaanshaha inay u raacdo liqitaanka, neefsashada, ama irbadda.

Calaamadaha sakhradda fentanyl waxaa ka mid ah:

- Jahawareer
- indho yar-yaraan
- Cilado xaga neefsashada ah, isku buuq, ama xidhitaan
- Lulo
- Miyir beel
- Yalaalugo/matag

Haddii ay dhacdo u bandhignaanta fentanyl, iyo muuqaalka calaamadahan, wac **(800) 222-1222** si aad ula hadasho **Xarunta Sunta ee Washington**.

Kahor tagga

Ka-hortagga isticmaalka xad-dhaafka ah ee fentanyl waxay ku lug leedahay taxaddar, sida:

- Ka fogaanshaha dhammaan daroogooyinka waddooyinka
- Weligaa ha qaadan wax ka badan qiyaasta daawada lagu qoray
- Waligaa ha isku darin daroogooyinka
- Kala hadal dhakhtarkaaga wax ku saabsan doorashooyinka maaraynta doorashooyinka xanuunka
- Inaad gacanta ku haysato Narcan sababtoo ah waa daaweyn degdeg ah oo loogu talagalay qiyaasta xad dhaafka ah ee daawooyinka la qaatay.



Taariikhda

Isticmaalka iyo baahsanaanta fentanyl ayaa si aad ah u kordhay sanadihii ugu dambeeyay, iyada oo dad badani aysan ka warqabin inay isticmaalayaan fentanyl. Fentanyl ayaa 50 jeer ka awood badan heroin 100 jeerna ka awood badan morphine.

Suurtagalnimada in dadka kale ay si ula kac ah ugu xidhan yihiin fentanyl waxay kor u kacdaa isticmaalkeeda iyo joogitaankeeda. Shaqaaluhu waxay qaadi karaan qaar ka mid ah tallaabooyinka badbaadada si ay u yareeyaan halista soo-gaadhista fentanyl.

Waa maxay fentanyl?

Fentanyl waxay ka samaysan tahay isku dhafka daawooyinka dhimirka oo awood leh oo u eg morphine. Dhakhaatiirtu waxay u qoraan daaweynta xanuunka degdega ah, laakiin sidoo kale si sharci darro ah ayaa loo sameeyay waxaana lagu qeybiyay suuqa madow sida dawooyinka faakihaysiga. Khatarta fentanyl waxay kordhisaa marka lagu isticmaalo walxaha kale, oo ay ku jiraan heroin, cocaine, iyo methamphetamine.


DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION CWP_0107 SM (04-2023) Somali



Halisaha ku Gedaaman Fentanyl



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taxadarka Dhinaca Badqabka

- Iska ilaali in aad wax ku cunto, ku cabto, ku cabto sigaar, ama aad musqusha ku isticmaasho meelaha fentanyl lagu ogyahay ama looga shakiyo.
- Ka dib markaad qabato meelaha wasakhaysan, iska ilaali taabashada indhahaaga, afkaaga, ama sankaaaga.
- Si loo yareeyo khatarta u nuglaanshaha, laguma talinayo in lagu sameeyo baadhitaanka goobta fentanyl ama daawooyin aad ugu dhow fentanyl laga heli karo.
- Iska ilaali inaad samayso wax shaybaadh ama maarayn ah oo sababi kara in fentanyl uu hawada ku duulo, una wac shaqaale PPE ah wixii intaa ka badan iyo shaqaale aqoon leh.
- Kadib soo-gaadhista fentanyl-ka ee suurtoogalka ah, iyo ka hor inta aanad goobta ka tagin, gacmahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo isla markiiba.
- Waligaa waxyaabaha lagu maydho ama gacmo nadiifiye ha u isticmaalin meelaha maqaarka ee dhibku soo gaadhay.



Calaamadaha isticmaalka badan ee fentanyl

Calaamadaha isticmaalka badan ee fentanyl waxa kamid ah:

- Dhaq-dhaqaaq la'aan
- Suutrognimada neefqabatow
- Neef tuur ama khuuro
- Qofka oo aan kici karin
- Maqaar qalafay oo qabaw
- Wiilasha indhaha oo yaraada
- Neefsiga oo hoos u dhaca ama la waayaba
- Isku xidhka jidhka oo luma
- Cidiyaha iyo bishmaha oo buluug noqda
- Hadal isku dhexdaadsan ama isku dhex yaac

Wac 911, ama raadso gargaar caafimaad isla markaaba, haddii aad ka shakisan tahay in qof uu si xad dhaaf ah u isticmaalay fentanyl ama daawooyinka dhimirka ee kale. Qof kasta oo muujiya calaamadaha isticmaalka xad-dhaafka ah ee daawooyinka dhimirka waa in la siiyaa Narcan. Iyadoo la tixgelinayo sida fentanylku u awood badan yahay, waxay mararka qaarkood qaadataa dhowr jeer in la qaato Narcan si ay qofka ugu soo celiso neefsashada caadiga ah.

